



**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

**Golaha Shacabka**

**QARAAR GOLAHA SHACABKA**

**KU SAABSAN**

**IN AGOOSTO 2016 AYSAN DHICI KARIN DOORASHO  
QOFKIIBA – HAL – COD**

**Mogadishu, 28<sup>ka</sup> Luulyo 2015**

### GOLAHA SHACABKA:


**Markuu dhageystay:** Warbixinta Guddi Hoossaadka ka soo talo-bixinta Siyaasadda ugu habboon ee loo jiheynayo Geeddisocodka 2016;

**Markuu Dhageystay:** Hadaljeedinta Ra'iisal Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ee ku saabsan Nidaamka Doorashooyinka 2016;

**Asaga oo ku kulansan:** Kalfadhiga 6aad Fadhiigiisa 24aad ee 28<sup>kii</sup> Luulyo 2015 waxay labada Gole ee Sharcidejinta iyo fulinta wadar oggol ku ansixiyeen saddexda qodobka ee hoos ku qoran:

1. Labada gole ee dowladda waxay isla garteen iskuna raaceen in sanadka 2016 aanay dalka ka dhici karin doorasho hal qof iyo hal cod ah;
2. In la qabto shirweyne heer Qaran oo ay ka qeyb galayaan golayaasha dowladda iyo maamul goboleedyada dalka, kaasoo looga tashanayo tallaabada ay dowladda qaadeyso si dalka doorasho uga dhacdo Agoosto 2016;
3. In qabanqaabada howsha Hiigsiga 2016 iyo tallaabada dowladda qaadeyso lagu soo gabagabeeyo dhammaadka sanadkan 2015, si 2016 shaqada u bilaabato.

Qaraarkan wuxuu ku ansaxay wadar-oggol labada Gole ee Sharcdejinta iyo Fulinta Dowladda.

  
**M. ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"**  
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka**

